IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA
# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 12aad Muqdisho 1 Jenayo 1984 L. 1

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.**

## K O O B N I I N

## QAYBTA KOWAAD

## S H A R C I

| | | |
|---|---|---|
| SHARCI L. 1 ee 1 Jen. 1984, Oggolaansho ha Miisaaniyadda ku-la-galka ee sannadka 1984. | BOG. | 2 |
| SHARCI L. 2 ee 7 Jen. 1984, Isbeddelka 2aad ee Miisaaniyadda 1992. | » | 4 |
| SHARCI L. 3 ee8 Jen. 1984, Wax ka beddelid Sharciga Shaqaalaha Dawladda (Sharci L. 5 ee 2da Febraayo 1980). | » | 6 |
| SHARCI L. 4 ee 9 Jen. 1984. Oggolaanshaha Xisaabxirka Miisaaniyadda 1982. | » | 7 |
| SHARCI L. 5 ee 9 Jen. 1984, Oggolaansho Heshiis wax wada qabsi xagga dhaqaalaha Ganacsiga iyo Maalgelinta oo dhexmaray J.D.S. iyo J/yadda Federaaliga ah ee Jarmalka. | » | 8 |

Wakaaladda M. Qaranka

SHARCI L. 6 ee 9 Jan. 1984, Wax ka bedde-lid sharci L. 5 ee 11.12.1968 iyo Sharci L. 3 ee 10.1.68. kuna saabsan tacriifada Furdada maamulka iyo tirada. » 9

QAYBTA LABAAD
XEER

XEER SHARCI L. 1 ee 1 Jen. 1984, Fasax Qalab ka keenid dibedda, oo ku meel gaara. » 10

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 1 ee 9 Jen. 1984. Meel-marinta Heshiis wax wada qabsi xagga dhaqaalaha ganacsiga iyo maalgelinta oo dhexmaray JDS iyo J/yadda Federaaliga ah ee Jarmalka. » 13

DECREE N. 1 of 9 Jen. 1984, Instrument of Ratification. » 14

XEER Sharci L. 2 ee 7 Jen. 1984, Canshuurta Gadidda. » 15

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA

QAYBTA SADDEXAAD

SOMALI BOTTLING COMPANY HARGEYSA U YEERID » 21

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 6.12.83, Lumid Buug Keyd L. 5690 ku qoran Maxamed Cali Maxamuud » 22

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER 30.8.83, Lumid Jeeg War. L.560538 ku qoran Axmed Furre Ubaxle » 23

## QAYBTA KOWAAD
## SHARCI

Sharci lambar 1 taariikh 1 Jen. 1984, Oggolaanshaha Miisaaniyadda ku-tala-galka ee sannadka 1984.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

### Qod. 1aad

Dawladda waxaa awood loo siiyey in ay soo ururiso dakhliga iyo in ay bixiso kharashka ku qoran miisaaniyadda halkan ku lifaaqan iyadoo la raacayo Xeerka habka iyo nidaamka u degsan Maamulka Xisaabaadka iyo Hantida Dawladda.

### Qod. 2aad

1. Isbeddelka ku saabsan Madaxyada miisaaniyadda waxaa lagu soo saarayaa Sharci.

2. Kala wareejinta ku saabsan Madax-xigeennada isku madax ah waxaa awood u leh Golaha Wasiirrada.

3. Kala wareejinta ku saabsan xarfaha hoos yimaada Madax-xige waliba ee Miisaaniyadda Dawladda Dhexe waxaa awood u leh Wasiirka Wasaarad waliba.

Kala wareejinta ceynkan oo kale ah ee miisaaniyadda Dawladda Hoose waxaa awood u leh Guddoomiyaha Golaha Horumarinta ee Gobolka.

### Qod. 3aad

1. Miisaaniyadda loogu talo galay Mashruucyada horumarineed iyo fulinta Qorshaha Qaranka waxaa loogu isticmaali karaa oo keliya mashruuc horumarineed.

2. Wasiirka Maaliyaddu wuxuu awood u leeyahay in uu keyd ka dhigo haddii loo baahdo dhammaan ama qayb ka mid ah lacagta ku jirta Madax-xige waliba ee Miisaaniyadda isagoo raacaya Sharciga.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da Jennaayo 1984, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 1.1.1984

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 2 taariikh 7 Jen. 1984, Isbeddelka 2aad ee Miisaaniyadda 1982.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga

Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la oggolaaday isbeddelka 2aad ee Miisaaniyadda 1982, sida ka muuqato lifaaqa A ee Sharcigan.

Qod. 2aad

Sharcigan horay ayuu ka dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 7 Gen. 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

# LIFAAQA «A»

## DAKHLIGA

| MADAX—XIGE | TILMAAN | Qiyaasta hore | Isbeddelka | Qiyaasta Cusub |
|---|---|---|---|---|
| 1. 1. 1· | Canshuurta keenidda Alaabta | 1·200.000.000/= | 600·000·000/= | 1·800·000·000=/ |
| 1· 1· 2· | Canshuurta Diridda Alaabta | 34·000·000/= | 200.000·000/= | 234.000·000/= |
| 1· 1· 4. | Diiwaangelinta | 64.000.000/= | 100.000·000/= | 164·000·000/= |
| 4. 1· 1. | Ganaaxa | 8.000·000/= | 63.397·000/= | 71·397·000/= |
| | | 1·306·000.000/= | 963.397.000/= | 2·269·397·000/= |

Sharci lambar 3 taariikh 8 Jen. 1984, Wax ka beddelid Sharciga Shaqaalaha Dawladda (Sharci lambar 5 ee 2da Febraayo 1980).

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Qolobka 11aad, Sharciga lambar 5 ee 2da Febraayo 1980, waxaa loo beddelay sida soo socota:

1. Sitayaasha Shahaadada Dugsiga Sare ama wax u dhigma, waxay Shaqada Dawladda ku gelayaan tartan imtixaan.

2. Tartanka waxaa ka qeyb geli kara qofkii soo maray Dugsiga Tababarka ee Xalane, soona gutay waajibaadka Shaqada Qaranka ama Hawsha Difaaca Qaranka.

3. Imtixaanka tartanka ahi waxaa maamulayo Guddiga ku tilmaaman Qod. 14aad ee Sharcigan.

Qod. 2aad

Waxaa la buriyay sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 3aad

Dhaqan galka Sharcigani wuxuu ka billaabanayaa 1da Luulyo 1983, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 8 Gen. 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 4 taariikh 9 Jen. 1984, Oggolaanshaha Xisaabaadka Miisaaniyadda 1982.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la oggolaaday Xisaab-xirka Miisaaniyadda Dawladda 1982 oo ah sida ku tifaftiran lifaaqa (A).

Qod. 2aad

Sharcigan waxaa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 9 Gen. 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 5 taariikh 9 Jen. 1984, Oggolaanshaha Heshiis Wax wada qabsi xagga dhaqaalaha Ganacsiga iyo Maalgelin oo dhexmaray J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Federaaliga ah ee Jarmalka.

MADAmWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meel-marinta heshiiska wax wada qabsiga xagga dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maalgelin oo dhexmaray J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Federaaliga ah ee Jarmalka.

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Boon ee Dalka Jamhuuriyadda Federaaliga ah ee Jarmalka, taariikhdu markay ahayd 27 Nofembar 1981.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay sharciga isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobada heshiiska ku tilmaaman qodobka 1aad ee sharcigan, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan sharci la heer ah sharciyada iyo xeerarka Dalka, waxaana dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyay inuu meel-mariyo heshiiska sharcigan lagu tilmaamay.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 9 Gen. 1984

MADAXWEYNAHA JDS

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 6 taariikh 9 Jen. 1984, Wax ka beddelid Sharci lambar 5 ee 11.12.1968 iyo Sharci lambar 3 ee 10.1.78. kuna saabsan tacriifada Furdada maamulka iyo tirada.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Qalabka caafimaadka ee ku tixan codadka 90.17 ilaa 90.20 ee tacriifada Furdada, waa laga dhaafay canshuurta keenidda iyo tan maamulka iyo tirada.

Qod. 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 9 Jen. 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

## QAYBTA LABAAD

## XEER

Xeer-sharci lamabr 1 ee 1da Jennaayo 1984: Fasax qalab ka keenid dibedda oo ku meel gaara.

### MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dactuurka;

MARKUU ARKAY: Xeerka sharci lambar 4 ee 30ka Setember 1981. kuna saabsan joojinta wax ku keenidda habka Faranka Faluutada iyo beddelaayadii ka dambeeyey;

MARKUU TIXGELIYEY: Jiilaalka adag ee nagu soo fool leh;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in Dawlad iyo Dadweynaba la iska kaashado sidii looga gaashaaman lahaa cawaaqibta roob yarida oo dhibaato dhaqaale iyo mid bulshadeed xambaarsan;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay dow tahay in fursad la siiyo hantida gaar ahaaneed oo ay ku gudato dowrkeeda bulshadeed ee dastuuriga ah, xagga kala qayb qaadashada Dawladda ka hortagga dhibaatada roob la'aanta ee Gobollada JDS intooda badani ka jirto;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in tillaabadaas si degdeg ah loo hirgeliyo, loona maro fulinteeda waddada sharciga ah ee ugu dhaqso badan;

MARKUU DHEGEYSTAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

TIXGELIYEYNA: Oggolaanshaha Golaha Wasiirrada;

### WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka sharci ee soo socda:

### Qod. 1aad

Isagoo sidiisii u taagnaanaya Xeerka sharci lambar 4, taariikh 30ka Setember 1981 ee lagu joojiyey hab-

ka Faranka Faluutada, waxaa si ku meel gaar ah oon caadi ahayn loo fasaxay in ICTIMAAD LA'AAN lagu keeno Dalka Baabuurro Booyada ama Xamuul ah.

Qod. 2aad

Baabuurta la keeni karo waxaa u yar LANR-ROVER.

Qod. 3aad

Waxaa reebban in la keeno BASAS, nooc kasta ha ahaadeene, iyo gawaarida xamuulka ee yaryar, sida «XAAJIYARDA» iyo wixii la mid ah.

Qod. 4aad

1. Waxaa kale oo la fasaxay in si ku meel gaar ah oon caadi ahayn ICTIMAAD LA'AAN Dalka lagu keeno RAASHIN.

2. Raashinka la keeni karaa waxa uu yahay: Bur, Bariis, Saliid, Sonkor, Caanaha Budada ah iyo Caleen Shaah.

Qod. 5aad

Muddada badeecadaha ku tilmaaman Qodobbada 1 iyo 2 ee Xeerkan sharci lagu keeni karo Dalka waa saddex bilood oo ka billaabata 1da Jennaayo 1984, kuna dhammaata 31ka Maarso 1984.

Qod. 6aad

Badeecaddii laga soo dejiyo dekadaha Dalka 31ka Maarso 1984ta kadib, waxaa loo aqoonsanayaa in ay sharci darro ku soo gashay Dalka waxaana la wareegeysa Dawladda iyadoon ka bixineynin wax qiime celin ah.

Qod. 7aad

Dawladda, hay'adaheeda iyo Wakaaladaha Madax bannaan ma iibsan karaan badeeco lagu soo geliyey Dalka habka Sharcigani uu idmay.

Qod. 8aad

Badeecadaha Xeerkan sharci uu tilmaamay waxaa lagu canshuurayaa tacriifada iyo nidaamka uu qorayo Sharciga Kastanka ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Kod. 9aad

Xeerkan sharci wuxuu dhaqan galayaa 1da Jennaayo 1984, waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda waxaana loo gudbinayaa, iyadoo la raacayo Qod. 69aad ee Dastuurka, Golaha Shacbiga si loogu rogo sharci.

Muqdisho, 1da Jennaayo 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre

Xeerka Madaxweynaha JDS, lambar 1 taariikh 9 Jen. 1984, Meel-marinta Heshiis wax wada qabsi xagga dhaqaalaha ganacsiga iyo maalgelinta oo dhexmaray J.D.S. iyo Jamhuuriyadda Federaaliga ah ee Jarmalka.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad, faqradda 5aad iyo Qod. 82aad, faqradda 4aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 5 taariikh 9.1.84 oo Guddiga joogtada ah ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday heshiiska xeerkan ku tilmaaman;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in heshiiskaas la meel-mariyo;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meel-mariyay heshiiska wax wada qabsi xagga dhaqaalaha ganacsiga iyo maalgelin oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Federaaliga ah ee Jarmalka, heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaaalada Boon ee Dalka Jamhuuriyadda Federaaliga ah ee Jarmalka, taariikhdu markay ahayd 27 Nofembar 1981.

Qod. 2aad

Heshiiskaas wuxuu Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ku yeelanayaa astaan sharci ah, wuxuu dhaqan gelayaa marka la is dhaafsado warqadaha meel-marinta.

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Mugdisho, 9 Jen. 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

DECSEE No. 1 of 9 Jan. 1984, Instrument of Ratification.

THE PRESIDENT OF SDR

HAVING SEEN: Artiule 67 (5) and Article 82 (4) of the Constitution of S.D.R.;

HAVING SEEN: Law No. 5 of 9.1.84 on the base of which the People's Assembly has approved Agreement specified in this Decree;

HAVING CONSIDERED: The necessity to ratify this AGREEMENT;

HEREBY PROMULGATES

Article I

The Agreement between the Somali Democratic Republic and The Federal Republic of Germany for the encouragement and protection of private investiments, signed at Bonn on 27 November 1981, IS HEREBY RATIFIED.

Article II

This Agreement shall have a force of Law in the Territory of the Somali Democratic Republic and it's Implementation Will effeca upon the echange of instru ment of ratification.

Article III

This Decree shall come into force upon signature by the published in the Official Bulletin.

Mogadishu, 9 Jan. 1984

THE PRESIDENT OF S.D.R.
(Mohamed Siad Barre)

Xeer Sharci lambar 2 taariikh 7 Jen· 1984, Canshuurta Gadidda.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 69aad ee Dastuurka;

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida loo qabo in la helo ilo lagu kobciyo dakhliga Miisaaniyadda Qaranka si ay Dawladdu ugu hesho awood ay ku taabbo-geliso mas'uuliyadaheeda ballaaran ee dhaqaale, nabadgelyo, Difaac, Bulsho iyo Siyaasadda;

MARKUU DHEGEYSTAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

MARKUU TIXGELIYEY: Dabeecadda deg degga ah ee canshuur abuuridda;

TIXGELIYEYNA: Oggolaanshaha Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Sharci ee soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la abuuray canshuurta gadidda oo ku waajibaysa:

1· Keenidda badeecadda;
2· Ganacsiga Jumlada;
3· Qaansheegtada Hoteelka;
4· Badeecadda ay soo saaraan Warshadaha.

Qod· 2aad

Haddii qodobada sharcigan ayan si kale u sheegin magacyada soo socda, waxaa loola jeedaa micnaha mid walba ku hor qoran:

b) Keene waa qofka ama Shirkadda dibadda alaab ka keena;

t) Ganacsade jumlo waa qof kasta oo ah dabiici ama qaanuuni, tayid ama Dawlad, oo sameeya ganacsi jumlo;

j) Ganacsi jumlo waa gadidda aan ku soconin qofka ugu dambeeya ee si toos ah u isticmaalaya badeecadaha;

x) Warshad waa makiinado iyo qalab meel ku rakiban looguna tala galay inay alaab ceyriin ama la farsameeyay bedlelaan ama ay sameeyaan farsamo aan isbedel keeneynin hase ahaatee kordhineysa qiima ha alaabada cayriin;

kh) Warshadle waa qofka leh warshadda, ha ahaado dabiici ama qaanuuni, rayid ama Dawlad.

Qod. 3aad

Canshuurta gadidda waxaa bixinayo soo dejiyaha, gataha ama jiiftaha Hoteelka.

Qod. 4aad

1. Tacriifada canshuurta gadidda waa 5% qiimaha badeecadu ku soo degtay ee canshuurta Furdada lagu daro, lagu kala gatay ama qiimaha qaansheegta hoteelka.

2. Qaansheegatooyinka ay ku waajibto canshuurta gadidda, waa kuwa deeysan yihiin canshuurta boolada, ee ku xusan qodobka 7aad ee Sharciga lambar 6 ee 7.12.66.

Qod. 5aad

Canshuurta gadidda waxay waajibaysaa mar allaale markii badeecada soo degto ama uu dhaco wax is dhaafsiga badeecada ama hawsha, haddii aan la kala qaadan qiimaha wax is dhaafsiga kolay ku tahay.

Qod. 6aad

1. Canshuurta waxaa lagu uruurinayaa boolo u gaar ah oo lagu dhejinaayo qaansheegtooyinka ku xusan qodobka 9aad ee sharcigan.

2. Hase ahaatee canshuurta gadidda ee ku waajibta soo dejinta waxaa lacag ahaan loola qaadanayaa canshuurta Furdada.

3. Teeda kale, Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda waa ruqsayn karaa in canshuurtaas Xafiisyada furdooyinka iyo canshuurraha dadban ay lacag ahaan u qabtaan isaga oo mar walba u dejinaaya nidaam sugayo soo xeroodka canshuurta.

Qod. 7aad.

1. Boolada ku xusan qodobka sare waxaa soo saarayso Wasaaradda Maaliyadda midiiba wuxuu u qaybsamaa labo, waxayna leeyihiin midab kala duwan iyo lambar kow (1) iyo labo (2) qaybta ama lambarka koowaad waxaa lagu dhejinayaa asliga ama qaansheegta uu qaadanayo canshuur bixiyaha, kan labaadna waxaa lagu dhejinayaa nuqulka ama qaansheegtadu haraysa qofka bixinaayo qaansheegta.

2. Cabirka, qaabka iyo muuqaalka boolada waxaa lugu gooynayaa Xeerka Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

3. Habka gadidda iyo u qaybinta Dadweynaha iyo Hay'adaha Dawladda iyo helid la'aanta boolada waxaa loo raacayaa Sharci lambar 6 ee 7.12.66.

Qod. 8aad

1. Uruuinta iyo maamulka Canshuurta gadidda waxaa u xil saaran Furdooyinka iyo Xafiiska Canshuurta Berriga ee dadban, iyo laamaha Canshuuraha ee Gobollada iyo Degmooyinka.

2. Ilaalinta iyo hubinta ku xad-gudubyada canshuurtaan waxaa u xil saaran Xafiisyada ku xusan faqradda sare, Booliska ilaalinta canshuuraha iyo guud ahaan Ciidamada Nabadgelyada iyo Xafiisyada Dawladda.

Qod. 9aad

1. Ganacsadaha jumlada, Warshadlaha, Hoteelaha waa in ay sameeyaan qaansheegto markasta oo cid badeeco ka iibiyaan ama hoteelka qof jiifto, hubiyaana in qaansheegtaas lagu dhajiyay boolo u dhiganta 5% ee:

b) Qiimaha badeecada la kala iibsaday;

t) Qaansheegta Hoteelka.

2. Xagga soo dejinta, canshuurta waxaa lagu cabbirayaa 5% iyadoo lagu dhufanayo qiimaha furdada canshuurtay. Marka canshuurta la xisaabinayo, jajabka waa in la gaarsiiyaa Sh. So. 100/=.

3. Qansheegtooyinka waa inay u lambareeysan yihiin si is daba taxan, iyadoo ka bilaabanayo kow (1) sanad walba iyo taariikhda.

Qod. 10aad

1. Ganacsadaha jumlada, soo dejiyaha iyo Warshadlaha, haddii ay badeeco u gudbiyaan rugtooda ee tafaariiqeed, waxaa waajib ku ah inay isu sameeyaan qaansheegto, canshuurtana ku bixiyaan habka iyo nidaamka ku qoran qodobka 9aad.

2. Sidaasoo kale, dadkaasi waa inay canshuurta ku bixiyaan isu samaynta qaansheegto wixii tafaariiq ugu gadaan xaruntooda ganacsiga ama Warshadeed.

Qod. 11aad

Qofka qaansheegti bixinayo waxaa waajib ku ah in boolada qaansheegta lagu dhajinaayay uu shabadeeyaa ama istilaab muuqata ku sammadeeyaa.

Qod. 12aad

1. Warshadle kasta, ha ahaado rayar ama Dawlad, waxaa waajib ku ah inuu sameeyo buug lagu qoro:

b) Wax soo saarka Warshadda;

t) Bakhaar soo gelidda iyo bixidda badeecadda.

2. Buuggaas waa in loo qoraa, keediyaa, loona shabadeeyaa habka iyo nidaamka ay qorayaan shuruucda Waddanka u degsan.

Qod. 13aad

Lama hordhigi karo, lagamana qaban karo Maxkamad ama Xafiis Dawlad qaansheegto ay ku waajibtay canshuurta gadidda, haddii aan laga bixin canshuurtaas.

Qod. 14aad

Qof kasta oo Sharcigaan ama mid kale ku khasbaayo inuu sameeyo buug xisaabeed ama qaansheegto waxaa khasab ku ah in uu u soo bandhigo markasta oo ay waydiistaan Saraakiisha iyo Ciidamada ku shaqada leh uruurinta iyo ilaalinta canshuurta gadidda.

Qod. 15aad

1. Qof kasta ee gudan waaya waajibaadyada ku saabsan samaynta ama isu saamaynta qaansheegto iyo haynta buugaagta ku xusan qodobka 10aad, wuxuu galayaa gef ciqaabtiisu tahay ganaax qiyaastiisu tahay Sh. So. 60.000/= ilaa Sh.So, 240.000=/.

2. Bixin la'aanta canshuurta ama bixinta tiro ka yar intii waajibtay waxaa la saarayaa ganaax caddadiisu tahay 20 ilaa 60 jeer canshuurtii baaqatay.

3. Qof kasta ee fulin waaya waajibaadka ku xusan qodobka 14aad ee sharcigan, haddii falka uusan keenaynin dembi, ka culus wuxuu mutaysanayaa ganaax u dhexeeya Sh.So. 50.000/= ilaa Sh.So, 200' 000/=

Qod. 16aad

Qof kasta ee lagu helo in uu ku qoray qaansheegto ama buug xisaabeed qiima ka hooseeya kan dhabta ah. asaga oo ula jeedadiisu tahay inuu la baxsado canshuurta gadidda, wuxuu mutaysanayaa ganaax dhan Sh.So. 500 ilaa Sh.So. 2.000/= halkii qaansheegto ama qoraal.

Qod. 17aad

Been abuuridda iyo laba goor isticmaalka boolada canshuurta gadidda, ka sokow ciqaabaha uu qorayo Xeerka Ciqaabta wuxuu mutaysanayaa ganaaxa ku xusan qodobka 15aad faqraddiisa labaad.

Qod. 18aad

1. Inkastoo fulin La'aanta qodobada sharcigaan ay keenayso ganaax, waxaa dheer in qofkasta markasta ay waajib ku tahay bixinta canshuurtii ku baaqatay.

2. Xafiiska canshuuraha dadban, kaddib markuu ka qaado canshuurtii iyo ganaaxii ku waajibay, waa in uu ku dhuftaa qaansheegta shaabad muujinaysa in qaanuunka la waafajiyay qaansheegtaas.

Qod. 19aad

Dhinaca saxiixa ama qaata qaansheegto aan sharcigaan waafaqsaneen wuxuu wax ka qaadayaa masu'uuliyadda ka dhalanayso ku xad-gudubka sharcigaan.

Qod. 20aad

1. Waxaa canshuurta gadidda ka daysan cunnada marka laga reebo kuwa gasacadaysan, daawada, nalka,

biyaha, shidaalka iyo waxyaabaha ka soo baxa beeraha Dalka, Xoolaha iyo wixii dibadda loo dhoofiyo.

2. Waxaa kale ee canshuurta gadidda ka daysan badeecooyinka iyo qalabka uu keensado qof ama hay'ad laga dhaafay ama ka daysan canshuurta keenidda, badeecooyinka iyo qalabka si ku meel gaar ah loo soo dejiyay.

Qod. 21aad

Xuquuqda Dawladda ee ku saabsan soo xaraynta canshuurta gadidda iyo ganaaxyada la xiriira, waxay ku gubanayaan 10 sanadood oo ka bilaabanaysa taariikhda canshuurtu waajibtay.

Hase ahaatee, gubashada xuquuqda Dawladda marnaba ma xalaalaynayso in dokumentiga canshuurta ku waajibtay la isticmaalo iyadoon canshuurta la bixin.

Qod. 22aad

Hubinta ku xad-gudubyada qodobada sharcigaan, dacwooyinka ka dhalanaaya iyo maamulkooda waxaa loo raacayaa sharci lam. 21 ee 1.8.66. Sidoo kale khasab ku qaadidda canshuurta gadidda iyo ganaaxyada la xiriira waxaa loo raacayaa habka sharciga canshuurta toosan. sharci lambar 5 ee 5.1.66.

Qod. 23aad

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda, waxaa awood loo siiyay inuu soo saaro Xeer Nidaamiye Maamulka iyo fulinta Sharcigan.

Qod. 24aad

Waxaa la buriyay qodobada 17, 18 iyo 19 ee sharciga lambar 6 ee 7.12.66 keliya xagga Warshadaha iyo ganacsadayaasha kale ay ku waajibti canshuurta gadidda.

Qod. 25aad

Xeerkan Sharci wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda, waxaana loo gudbinayaa Golaha Shacbiga si loogu rogo Sharci.

Muqdisho, 7 Jen. 1984

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

SOMALI BOTTLING COMPANY HARGEYSA

## YEERID

Waxaa Saamileyda Shirkadda «Somali Bottling Company» ee Hargeysa la wargelinaya in maalinta 31ka Maarso 1984kii. Saacadduna tahay 4ta gelinka dambe, Xarunta Shirkadda ee Hargeysa lagu qaban doono Shirweynaha Sannadlaha sidii looga arrinsado xaajadaha kala ah:

1. Oggolaanshaha Miisaaniyadda Sannadka 1983kii
2. Doorashada Guddiga Maamulka.
3. Wixii kaloo la soo jeediyo.

Shirkaasi haddii maalintaasi ansixi waayo waxaa marlabaad Saamileyda loo baaqaya in Shirweynahaas lagu qaban doono maalinta 9aad ee bisha Abriil 1984kii isla meesha iyo saacadda kor lagu soo tilmaamay.

SOMALI BOTTLING COMPANY
Guddoomiyaha iyo Maamulaha Idman
(Maxamuud Axmed Maxamed Wiliq Wiliq)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda Kod ku qoran

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambar kiisu ahaa 5690 lagana soo saaray Bankiga Ganacsi ga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 1aad kuna qo rneyd lacag dhan Sh.So. 10.000 uu iska lahaa Faxa med Cali Maxamuud oo Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeel Laanta 1aad.

HADDUU ARKAY: Qol. 69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd lam. 5690 oo ku qoran magaca Maxamel Cali Maxamuud ay na ku jirto lacag lhan Sh.So. 10.000.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka laanta 1aad u bedelo Maxamed Cali Maxamuud Buuga Kaydka, ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maa lmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Ras miga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 6.12.83

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER

UJEEDDO FAAFIN JEEG LUMAY

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. Togdheer Burco

IYADDOO UU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Cad deyn Jeeg Lumay

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Burco

HADDUU ARKAY: Qod. 69,D,L, (9.9.65 Lumid Jeega War. ee Lamb. yahay 560538 kuna qoran yahay Axmed Furre Ubaxale kuna qorantahay lacag dhan Sh.So. 50.000.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeegaas War. ee kor ku xu san Jaalle Axmed Furre Ubaxale markii ay ka soo wareegto muddo 20 maalmood laguna shaaciyo Faa finta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeega cusub ee la sameyn doono Gacanta laga saaro Jaalle Axmed Furre Ubaxale iyadoo la sugayo mudada kor ku xusan.

(Dr. Cabduraxmaan Sh. Maxamed)
Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. Togdheer Burco

(Xaliimo X. Cabdi Aadan) (Tnzania)
Maxkamadda Gobolka Togdheer Burco.

30.8.83.